



Magaalada Seattle Xaalka Waaxda Macluumaadka Tiknoolajiyada

Waxaanu samaynaa tiknoolajiyadu inay u shaqayso Magaalada

Hawsha Waaxda Macluumaadka Tiknoolajiyadu waa inay samayso tiknoolajiyadu siday ugu shaqayn lahayd Magaalada. Waxaanu hubinaa in nidaamyada kombuyuutaradu si fiican u socdaan si loogu helo adeegyada Magaalada internetka, sida iibsiga ruqsadaha iyo shatiyada, codsiga shaqada, iyo bixinta tigidhada baarkinada. Waxa kale oo maamulaa raadiyaha adeega degdega, talefoonada iyo nidaamyada emailka.



Xafiiska Isgaadhsiinta Kaybulka

Magaaladu waxay la leedahay leedahay heshiish laan-ganacsi oo talefishan Comcast iyo Broadstripe. Waxaanu maamulaa Xeerka Xuquuqda Kaybulka ee Macmiilka si loo hubiyo inuu qof walba uga helo adeeg hufan oo quman sharikadaha caybulka.

Janalka Seattle

Janalka Seattle (cable Channel 21) wuxu sii daayaa barnaamijyo telefshan si looga gargaaro dadka Seattle siday ugu xidhmi lahaayeen dawlada Magaalada. Barnaamijyada waxa ka mid ah fadhiyada Guddiga Magaalada, xafladaha xaafadaha, iyo xafladaha farshanka iyo dhaqanka ee magaalada. Barnaamijyada waxa kale oo laga heli karaa Internetka www.seattlechannel.org.



www.seattle.gov



Bogga internetka ee Magaalada, www.seattle.gov, wuxu bixiyaa qaab ay dadweynuhu ku gaadhi karaan Magaalada 24 saac maalintii. Waxaanu mudnaan

siinaa hawlaha Magaalada, helitaanka Duqa iyo Guddiga Degmada, tusaha dhamaan shaqaalaha, waaxyaha iyo adeegyada magaalada. Waxaad iska saji kartaa liistada emailada ama bixinta biilasha Magaalada. Bogga internetka ee Magaalada wuxu bixiya macluumaad loo tarjumay afaf kala duwan. Macluumaad (Soomaali ah) waxa laga heli karaa www.seattle.gov/html/citizen/language.htm.

Hubinta helitaanka tiknoolajiyada ee qof kasta

Magaalada waxay u heelan tahay hubinta in qof walba haysto tababarka tiknoolajiyada iyo helitaanka looga baahan yahay ka qaybgalka hawlaha magaalada iyo dhaqanka, shaqada iyo barashada joogtada ah. Waxaanu bixinaa helitaan bilaash ah oo kombuyuutar dhamaan xaafadaha Magaalada. Waxa kale oo aanu siinaa ururada samofalka ah tababr tiknoolajiyo, helitaam kombuyuutar iyo masgruucayada magaalada.

Waxaanu siinaa samofalka adeeg internet kaybul oo bilaasha. Waxa kale oo aanu kafiilanaa kobcinta Puget Sound Off, www.pugetsoundoff.org, bog internet oo loo agaasimay dhalinyarada si ay u wadaagaan waxyaabaha ay daneeyaan, farshaxanka iyo kawada-hadalka mawduucyada muhiimka ah.



Macluumaadka Xidhiidhka

Fadlan nagala soo xidhiidh DoITreceptionist@seattle.gov ama wac 206-684-0600. Xafiisyadayadu waxay ku yaalaan Seattle Municipal Tower, 700 5th Ave, Suite 2700, P.O. Box 94709 Seattle, WA 98124-4709.

Greg Nickels, Duqa Magaalada